Kaaliyahaaga ee adeegsiga looyarka

The Law Society

Badankeena looyar baan u baahanaa mararka qaar ee nolosheena. Badanka arrimaha caadiga ah waa kuwo ku saabsan iibsashada guri, furriinka ama sameynta dardaaranka. Illaase, waxaa kaloo suurtowda in aad u baahatid goorta aad guri la degeysid xaaskaaga (partner), aad ganacsi billaabeysid, ama aad agaasimeysid dhaqaalaha qof duq ah.

Sharciga mararka qaar wuu adkaan karaa sidaasi awgeedna aad bay muhiim u tahay in ad heshid talabixinta ugu habboon. Looyarrada ayaa ku takhsuusaya arrimaha sharciga iyo sida uu kuu saameyn karo. Si aad heshid akhbaar sharciyeed ee aad isku halleyn kartid waa in aad la xiriirtaa looyar.

Xulashada looyarka

Si sahlan ayaad looyar uga heli kartaa xaafaddaada haddii aad adeegsatid leenka kaalmada ama boogeena intarneetka. Waxaad baaritaankaada ka billaabi kartaa wecitaanka telefoonka 0870 606 2555 ama bogga intarneetka ee www.lawsociety.org.uk/findasolicitor illaase waa in aad si aad ah uha fiirsataa noocyada adeegyada ee aad u baahan tahay. Halka waxaa ku qoran qaar ka mid ah arrimaha muhiimka ah ee tixgelinmudan.

Maxay tahay nooca kaalmada sharciga ee aan u baahan nahay?

Inkastoo ay jiraan looyarro badan oo hal ama laba adeeg gaar ah ku takhsuusay, waxaa suurtowda in hay'adaha looyarrada ay leeyihiin adeegyo kala duwan ee ku saabsan dhanka sharciga. Haddii shirkadda looyarkaada aysan qaban karin dhammaan arrimaha sharciyeed ee aad u baahan tahay, waxay si farxad leh kuugu gudbin doonaan looyar kale, ama haddii aad u baahan tahay, iyagoo kaa wakiil ah waxay talobixin ka raadsan karaan qof kaloo ku takhsuusay sharciga arrintaada.

Sidee baan ku ogaan karaa in ay aqoon u leeyihiin caawinteyda?

Dhammaan looyarrada biribbaatiga ah waxay haystaan shahaadada oggolaanshaha ee ay siisay Waaxda Maamulka Sharciga Bulshada (Solicitors Regulation Authority) taasi oo ah urur madaxbannaan (ay soo dejisay Sharciga Bulshada) taasi oo soo saartay sharciyada ay dhammaan looyarrada ku dhaqmaan. Taasi waxay caddeyneysaa in looyarka uu aqoon u leeyihiin qabashada adeegga oo weliba waxay leeyihiin caymis kaa badbaadin karo haddii ay dhacdo wax dhibaato ah. Haddaad dooneysid, si aad u hubsatid waad ka codsan kartaa in lagu tuso shahaadada (taasi oo ku dhegsan xafiiska gudahiisa meel laga arki karo) ama waxaad telefoon kula soo xiriiri kartaa Waaxda Sharciga Looyarrada ee ah 0870 606 2555 si aad uga hubastid.

Shirkadda looyarka waxaad ka codsan kartaa haddii shirkadda ay ku guuleysatay abaalmarinta tayada shaqada si aad u hubsatid in shirkadda ay ku caanbaxday waxqabad wanaagsan. Xaruunta Sharciga Bulsada ayaa kuu sheegi kartaa haddii shirkadda la siiyey Abaalmarinta Tayada ee 'Lexcel' ee Sharciga Bulshada (waxaad kala xiriiri kartaa iimeylka lexcel@lawsociety.org.uk ama telefoonka 020 7320 5933).

Waxaa suurtowda si ay u qabtaan dhowr adeeg, in looyarrada qaar ay xubin ka yihiin 'Guddiga xaqiijinta tayada' (quality-assured accreditation) ee ay dhistay xaruunta Sharciga Bulshada. Ku biiridda guddigaasi waxaa shuruud ah in shirkadda looyarka ay leedahay tayo wanaagsan iyo takhsuuska hawsha. Faafaahinta Find a Solicitor ee looyarrada xaafaddaada oo xubin ka ah guddiga waxaad ka heli kartaa bogga intarneetka ee www.lawsociety.org.uk. Halkaasi waxaad ka heli kartaa akhbaar buuxda.

Xaggee bay shirkadda ku tallaa?

Meesha ay shirkadda looyarka ku taallo waa arrin muhiim ah siiba dadka duqooshinka, kuwa xaunnusan ama curyaamiinta ah. Ma u baahan tahay in shirkadda looyarkaaga ay ahaato mid u dhow meesha aad deggen tahay? Haddii ay sidaasi tahay, waxaa suurtowda taasi ay soo koobto looyarrada aad dooneysid.Waxaa jiraa looyarro qaar ee diyaar u ah in ay guriga kuugu imaadaan haddii aadan socon Karin, illaase waa in aad weydisaa marka hore.

Miyey qabtaan hawsha kaalmada shargiga?

Haddii aad heshid dakhli yar ama ama aad qaadtid benifityada, waxaa suurtowda in aad heshid kaalmada arrimaha sharciga (legal aid). Waxaad cinwaankoda ka heli kartaa Xaruumaha Dadweynaha (Citizens' Advice Bureau) ama Xaruumaha Sharciga (law centre). Maaddaama ay jiraan looyarro oggol kaalmada sharciga iyo aan qaadan dadka doonayo kaalmada sharciga, taasi waxay kugu qasbi doontaa in aad soo yareysid noocyada looyarrada ee aad raadineysid. Liiska looyarradaasi waxaad ka heli kartaa bogga intarneetka ee Adeegyada Sharciga ee Bulsada (Community Legal Service) ee ah www.clsdirect.org.uk

Kaalmada Shargiga (Legal aid) waxaa maamulaa Guddiga Adeegyada Sharciga (Legal Services Commission) taasi oo xaqiijisa in dhammaan shirkadaha looyarrada ay leeyihiin tayo waxqabad oo sare.

Miyey jiraan wax shuruud ah ee ku xiran lacagta kharashka?

Kiisaska qaar sida dhaawac qofeed, waxaa suurtowda in looyarkaaga uu ku qabto lacag la'aan ku xiran shuruudo gaar ah. Tani waxaa loo yaqaanaa 'lacag ma bixin doontid haddii aadan guuleysan' (no win, no fee). Haddii aad kiiska ku guuleysatid, sida badan kharashka looyarkaaga waxaa bixin doontaa cidda kale ee aad ka guuleysatid, ee adiga ma bixin doontid wax lacag ah. Waxaa suurtowda in lagu faron in aad gashid caymis, si haddii kiiska lagaaga guuleysto uu caymiska u baxsho kharashka cidda kale. Waxaa jiraa noocyo badan oo ku saabsan lacagta kharashka looyarka ee shuruudda ku xiran, illaase waxaa suurtowda in badanka looyarrada aysan ku hawl gelin nidaamkaasi.

Miyey yihiin kuwo naxariis leh?

Haddii aad ugu baahan tahay arrimo gaar ahaaneed sida xiriirka qoyska ee burburay, waxaad u baahan doontaa looyar ku qanciyo oona ku dejiyo. Badanka looyarrada waa kuwo naxriis leh oona fahmi doonaa dhibaatadaada, illaase waxaa suurtowda in aad u baahan tahay looyar nin ah haddii aad nin tahay ama haween haddii aad haween tahay. Marna hakala baqin in aad u sheegtid waxyaabaha aad rabtid.

Miyey ku hadlaan luqaddeyda?

Haddii af Ingiriisigu uusan ahayn luqaddaada koowaad, waa in looyarka aad u sheegtid goorta aad isqoreysid. Haddii wakhti hore loo sii sheego, looyarka wuu kuu sii diyaarin karaa qof turjibaan ah oo ku hadla luqaddaada.

Sameynta ballanta

Goorta aad iska qortid looyarka aad u baahan tahay, waa in aad sameysataa ballan. Waa in aad usii sheegtaa haddii uu qof kale ku soo raaci doono iyo wixii dukumeenti ah sida caddeynta dakhliga ama benifitka ee aad soo qaadan doontid.

U diyaargarow

Waxaa habboon in wixii aad looyarka aad u sheegi lahayd aad sii diyaarsatid inta aadan looyarka la kulmin. Waxaa sii sameysataa liiska waxyaabada aah dooneysid in aad u sheegtid ama su'aallaha aad weydiin lahayd. Si diyaarso wixii dukumeenti qoraal ah ee aad dooneysid in aad kala hadashid ama aad tustid oo weliba waa in aad sii habeysaa si uu kuugu sahalnaado hadalka. Taasi waxay u suurtagelin doontaa in looyarka uu si dhaqso ah kuu fahmo kuuna siiyo akhbaarta aad u baahan tahay.

Kaaliyahaaga ee adeegsiga looyarka

The Law Society

Goorta kulanka

Waa in aad sii ogataa wakhti aad looyarka la joogi kartid si uusan wakhtiga kaaga dhicin adoon hadalkaada wada sheegin. Hoortaada ayaad dhigan kartaa qodobbada aad dooneysid in aad kala hadashid, kadibna waa in aad saxdaa mid kasta oo aad u sheegtay, hana ka baqin in uu ku fahansiiyo haddii aadan fahmin akhbaarta uu kmuu sheegay.

Ugu dambeyntii, waxaad looyarkaaga ka codsataa in uu kuu siro qoraalka akhbaarta aad u sheegtay, uuna kuu caddeeyo arrimaha soo socda.

- In uu la wareegay hawshii.
- Magaca qofka qaabbilsan kiiskaaga maalin kasta.
- Wakhtiga uu kiiskaaga qaadan doono.
- Kharashka ku bixi doono iyo ilaa xadka laguu oggol yahay.
- Wixii akhbaar kale ee lagaaga baahan yahay.

Kharashka looyarka

Talobixinta sida waxyaabaha kale ee aad soo gadatid waxaa laga baxshaa lacag, illaase qiimaha talabixinta waa mid aad muhiim u ah. Kharashyada looyarada wuu kala duwan yahay. Wuxuuna ku xiran yahay khibradda, aqoonta iyo sida kiiska uu yahay.

Waxaa goor kasta habboon, inta aadan go'aansan looyarka aad isticmaali doontid waa in aad marka hore soo eegtaa looyarro kale. Waxaa jiraa looyarro badan oo lacag yar ama lacag aan ka qaadin wareysiga ugu horreeya. Waa muhiim in aad ka wareysatid arrintaasi.

Haddii laguu xisaabi doonaa saacadaha shaqada waa in aad kula heshiisaa in lagu siiyo qiyaas go'an oo kooban. Haddii kharashka uu kor u dhaafay adeegga laguu qabtay looyarkaaga ayaa qoraal kuugu soo sheegi doona.

Qiimo go'an ee saacadda

Sida badan looyarrada goor kasta lacag go'an ma qaadaano. Sida badan kharashka waxaa lagu xisaabiyaa saacadaha shaqada la qabto, sidaasi awgeedna haddii saacadaha shaqada ay badato waxaa badan doonaa kharashka looyarka. Waxaana habboon in looyarka uu marka hore kuu sheego qiyaasta kharashka.

Haddii aad kula heshiisid in laguu xisaabiyo saacadaha shaqada, waxaa habboon in aad qabsan qiyaas lacag ee go'an. Haddii qiyaasta lacagta kor loo dhaafo, looyarkaada ayaa kula soo socodsiin doonaa kuna weydin doona haddii ay dacwada kuu sii socon doonto.

Ka warhaynta

Goorta looyarka aad qabsatid, si loo ogaado haddii aad sii wadan doontid dacwada, waain looyarka uu goor kasta kula soo socodsiiyaa halka ay xaaladda arrintaada mareyso. Sidoo kale waa in aad looyarkaaga u sheegtid wixii isbeddel ah ee kugu dhaco ee saameyn karo arrintaada. Taasi waxaa kamid ah xaaladda dhaqaale ee saameyn karto kaalmada dhaqaale ee aad heshid.

Akhbaar dheeraad ah

Tani waa mid ka mid ah xaashiyaha ku saabsan arrimaha adeegyada sharciga ee laga helo looyarrada. Hoos ayey ku qoran yihiin xaashiyaha kale. Waxaad ka heli kartaa looyarkaaga ama waxaad soo weci kartaa Xafiiska Sharciga Bulshada (Law Society) ee 0870 3333 084.

- Kaaliyahaaga ee ijaaridda gurigaaga
- Kaaliyahaaga ee iibsashada guriga
- Kaaliyahaaga ee sameynta dardaaranka
- Kaaliyahaaga ee Sameynta furiinka
- Kaaliyahaaga ee dhibaatooyinka shaqada
- Kaaliyahaaga ee sameynta ganacsiga
- Kaaliyahaaga ee sameynta codsiga magdhowga ee qofka
- Kaaliyahaaga arrimaha dhaqaale ee duqooshinka
- Kaaliyahaaga ee la degidda xaaskaaga
- Kaaliyahaaga ee ijaarashada guriga
- Kaaliyahaaga ee dardaaranka sharciyeed (probate)
- Kaaliyahaaga ee codsiga magangelyada

Waxaad heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran far waweyn, farta baraylka ee indhooleyaasha, iyadoo ku duuban cajaladda maqalka ama CD. Haddaad u baahan tahay mid ka mid ah kuwani, fadlan waxaad nagula soo xiriirtaa iimeylka accessibility@lawsociety.org.uk ama kala xoo xiriir telefoonka 0870 606 2555.

Waxaad kalood heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran luqado kala duwan. Waxaad ka daalacan kartaa boggeena intarneetka ee www.lawsociety.org.uk.

Lexcel

Look for Lexcel - the mark of excellence

The Law Society 113 Chancery Lane London WC2A 1PL Telefoonka: 020 7242 1222 www.lawsociety.org.uk

Inkastoo aanu ku dadaalnay tebinta akhbaar hufan, haddana ogsoonow, goor kasta qaynuunka iyo sharciga isbeddel ayaa lagu sameeyaa taasi oo qof kasta si gaar ah u saameyso. Xaashidani kuma saabsano akhbaar ama talobixinta shaqsiyaad gaar ah, sidaasi awgeedna mas'uul kama aanu nihin wixii dhibaato ah ee ka yimaaddo akhbaarta xaashidani.

Designed by dmlmarketing.co.uk Version 2, 2007 Your guide to using a solicitor - Somali